



**SMC 14.28 Dhaafida Qarashka Daryeelka Caafimaadka Ikhtiyaariga ah – 2024  
(EXP) (Voluntary Healthcare Expenditure (EXP) Waiver - 2024)**

Foomkaan waxaa la siin karaa shaqaale diiday soo jeedinta loo shaqeeyaha ee qarashka daryeelka caafimaadka ee bilaha ah ee ku cad Xeerka Kor U qaadista Daryeelka Caafimaadka ee Shaqaalaha Hudheelka, ee Maamulka Magaalada Seattle (SMC, Seattle Municipal Code) 14.28. Shaqaalaha doonaaya in laga dhaafo waa inay akhriyaan foomkaan si adag si ay u go'aansadaan u qalmidooda dhaafida qarashka.

*Loo shaqeeyaasha iyo shaqaalaha su'aalaha ka qaba foomkaan waxay la xariiri karaan Xafiska Heerarka Shaqaalaha (Office of Labor Standards) oo laga heli karo 206-256-5297 ama waxay booqan karaan webseetka OLS oo laga heli karo <http://www.seattle.gov/laborstandards/ordinances/hotel-employee-protections>.*

**Qaybta A. XOG KU SOCOTA LOO SHAQEYYAASHA**

**Loo shaqeeyaashu waa inay akhriyaan ayna buuxiyaan foomkaan kahor intaysan foomka siin shaqaale.**

Si uu u noqdo mid sax ah, dhammaan shuruudaha ku cad SMC 14,28 iyo Xeerka Aadanaha ee Seattle (Seattle Human Rights Rule) 190-250 waa in la raacaa. Tani waxaa ku jira, laakiin kuma koobna:

- Shaqaale laguma qasbi karo inuu saxiixo codsiga qarash dhaafka.
- Loo shaqeeyuhu waa inuusan soo jeedin ama qasab ka dhigin in shaqaaluhu saxiixo foomka.
- Foomka qarash dhaafka waa in si buuxda loo dhamaystiro.
- Foomka qarash dhaafka waxba lagama badeli karo sinaba.
- Foomkaan waa in shaqaalaha lagu siiyaa luuqadiisa hooyo. Foomkaan waxaa laga heli karaa asagoo luuqado kale ku qoran webseetka Office of Labor Standards.

**Qorshaha loo shaqeeyaha ee buuxinta qarashka daryeelka caafimaadka ee: \_\_\_\_\_  
(Magaca Koobaad iyo Saddexaad ee Shaqaalaha)**

Haa/Maya	Nooca Qarashka	Cadadka bishii
	Lacagaha lagu bixiyo caymiska caafimaadka ee shirkada loo shaqeeyo maal galiso	
	Lacagaha lagu bixiyo koontada kaydka caafimaadka	
	Lacagaha lagu bixiyo koontada qarashaadka caafimaadka	
	Lacagta lagu bixiyo koontada lacag bixinta kaladuwan	
	Nooc kale (sheeg):	
	Lacagaha dakhliga caadiga ah	

**Meesha lagala xariiraayo Loo shaqeeyaha: Shaqaalaha qaba su'aalaha la xariira qarashaadka lagu bixiyo dakhliga**

Magaca Loo shaqeeyaha	
Ciwaanka Loo shaqeeyaha	
Qofka lagala xariiraayo Loo shaqeeyaha	
lIMEELKA IYO TALEEFANKA LAGALA XARIIRAAYO	



**Qaybta B. XOGTA SHAQAALAHA EE KU AADAN XAQUUQDOODA**  
**Shaqaaluhu waa inay xogtaan u akhriyaan si taxadar leh.**

**Magaca Loo shaqeeyaha (Koobaad iyo Saddexaad):** \_\_\_\_\_

Sharciga Seattle ayaa ka doonaaya loo shaqeeyahaan inuu siiyo adigga ama wakiilkaaga qarashaadka caafimaadka ee bilaha ah. Qarashka daryeelka caafimaadku waa cadad lacageed oo shirkada aad u shaqayso bixiso si lagu siiyo helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka. Tusaale, shirkada aad u shaqayso ayaa:

- Bixin karta lacagaha si lagaaga qoro barnaamij caymiska caafimaadka bixiya;
- Ku shubi karto lacago koontada kaydka caafimaadka ama qarashka kaabida caafimaadka oo adigga laguugu talagalay; iyo/ama
- Ku siin karta lacagaha dakhliga caadiga ah.

Shirkada aad u shaqayso ayaa dooran karta qaababka ay u buuxinayso waajibaadkeeda sharciga ah. Cadadka lacagta shirkada loo shaqeeyo bixiso ayaa kala duwan ayadoo ku xiran cadadka dadka gurigaaga ku nool. Cadadka hadda la bixiyo ayaa ku qoran webseetka OLS.

Markay jiraan xaalado gaar ah, shirkada aad u shaqayso ayaa laga doonayaa inay bixiso qarashka daryeelka caafimaadkaaga xataa haddii aan shirkada aad u shaqayso wax qarashaad ah ku siin adigga ama wakiilkaaga. Si tani u dhacdo, arimaha soo socda waa inay suurtagalaan:

1. Qorshaha loo shaqeeyaha ee dhibista qarashka ayaa si buuxda u dhamaystiraysa cadadka aad ku leedahay.
2. Qorshuhu kaama doonaayo inaad dhibto wax ka badan \$106/bishii (2024) si aad u hesho qarashka daryeelka caafimaadka (tusaale, lacagaha joogtada ah ee caymiska caafimaadka shirkada aad u shaqayso maalgaliso).
3. Inaad si iskaa ah u diido dhammaan ama qayb ka mid ah qorshaha shirkada aad u shaqayso ee qarash bixinta.
4. Waxaad saxiixaysaa qarash dhaafka ikhtiyaariga ah.

Goorma ayay arintaani imaanaysaa? Caadiyan, tani waxay dhacaysaa haddii qorshaha shirkada aad u shaqayso ee buuxinta waajibaadkeeda ayadoo lacago ku bixinaysa in lagaa qoro barnaamij caymis caafimaad baxsha.

Haddii aad diido qayb ama dhammaan qaabka ay shirkada aad u shaqayso dooratay in lagu baxsho qarashka, shirkada aad u shaqayso ayaa kaa codsan karta inaad ka tanaasusho xaqa aad u leedahay qarashaadkaan adoo saxiixaaya foomkaan tanaasulka.

**Haddii aad saxiixdo foomkaan**, waxaad u sheegaysaa shirkadaan loo shaqeeyo inay joojin karto qarashaadka daryeelka caafimaadka ee qasabka ay tahay inay ku siiso ama ayadoo wakiil kaa ah ay bixiso. Tanaasulka ayaa kaliya shaqaynaaya hal sano. Shirkada aad u shaqayso waa inay foomka oo mar kale la buuxshay heshaa sanad kasta oo aad doonayso inaad ka tanaasusho xaqaaga.

Waxaad sidoo kale ka laaban kartaa (baabi'in kartaa) tanaasulka ikhtiyaariga ah inta lagu jiro muddo kasta oo diiwaan galinta sanad laha ah furan tahay ama ay kugu timaado dhacdo kaa dhigtay qof u qalma caymiska caafimaadka ee shirkadaadu dhiibto. Joojintaan waa inuu ahaado qoraal. Luuqada sanbalka ah oo aad adeegsan karta ayaad ka helayaa webseetka OLS.

**Haddii AADAN saxiixin laakiin aad sii wado inaad diido dhammaan ama qayb kamid ah qarashka daryeelka caafimaadka**, qasab maaha in shirkada aad u shaqayso kuusii wado qarashka daryeelka caafimaadka lagaaga bixinaayo.

**Haddii AADAN saxiixin, laakiin AADAN sii wadin inaad diido dhammaan ama qayb kamid ah qarashka daryeelka caafimaadka**, qasab weeye in shirkada aad u shaqayso kuusii wado qarashka daryeelka caafimaadka lagaaga bixinaayo.

**Bogga 2 ee 3**

**Shirkada loo shaqeeyo iyo shaqaaluhuba waa inay haystaan nuqulka foomkaan.**

**Nooca: 01/2024**



**TANAASULKA IKHTIYAARIGA AH EE SHAQAALAHA**

*Saxiix kaliya haddii aad doonayso inaad ka tanaasusho xaquuqdaada.*

Magaca Loo shaqeeyaha (Koobaad iyo Saddexaad): \_\_\_\_\_

Anoo hoos saxiixaaya, waxaan cadaynayaa anoo og inaan ciqaab ku mutaysanaayo haddaan been sheego sharciga Gobalka Washington in arimaha soo socda ay run yihiin:

- Waxaan akhriyay aana fahmay xogta kore ee ku saabsan xaquuqdayda ku cad sharciga.
- Waxaan diidayaa dhammaan ama qayb kamid ah qarashka daryeelka caafimaadka ee shirkada aan u shaqeeyo ay ii doortay, kaasoo ku qoran Qaybta A ee foomkaan.
- Waxaan doonayaa inaan ka tanaasulo xaqayga qarashaadka daryeelka caafimaadka ee shirkadaani isiinayso.
- Waxaan fahmayaa in tanaasulkaan uu shaqaynaayo hal sano.
- Waxaan fahmayaa inaan baabi'in karo tanaasulka anoo qoraal ku cadaynaaya.
- Haddii aan su'aalo qabo, waxaan la xariiri karaa qofka lagala xariiraayo shirkada aan u shaqeeyo ee ku qoran Qaybta A ee foomkaan.

Magaca Shaqaalaha			
Saxiixa			
Taariikhda		Goobta (Magaalada, Gobalka)	